

BUKAAN-SOCODKA KANSARKA IYO KANSARKA DHIIGA: JAWAABTA COVID-19

Waan idin salaamaynaa! Kooxda kansarka iyo kansarka dhiiga ee Isbitaalka Caruurta waxaan diyaar u nahay in aan ka jawaabno baahidiina iyo walwalkiina. Halkaan waxaan u joognaa waa idinka iyo qoysaskiina wakhtigaan adag oo aan hadda kahor ina soo marin.

Wakhtiga adeegyada:

Isniin – Jimce 8:30 subaxnimo ilaa 5 galabnimo wac 612-813-5940.

Saacadaha shaqada, Sabtida iyo Axada wac 612-813-5940, markaa waxaa aan la xiriiri doonaa dhakhaatiirta kansarka.

Waa in xoog la saaraa sidii aad uga fogaan lahayd meelaha dadku ku badanyahay iyo khatarta COVID-19 (oo hadana loo yaqaan fayraska koroono), yoolkuna yahay in aan ka fogayno, si ay u nabadqabaan bukaanadeena, qoysaska, shaqaalaha iyo dhakhaatiirta, waxaan si **MEEL KU GAAR AH** u badalaynaa daryeelkii aan ka bixin jirnay Bukaankii Socodka Kansarka iyo Kansarka Dhiiga ee Isbitaalka Caruurta.

Isbadaladaan soo socda ayaan ku shaqayn doonaa ilaa iyo amar dambe:

- Waxaan qiimaynaynaa u imaansha bukaan-socodka arimaha aan deg-dega ahayn, sida balamo buuxa oo lagu yimaado Bukaankii Socodka. Balan dhigayaashayada ayaa kula soo xiriiri doona, haddii balan la dhigayo.
- Waxaa suurto gal ah in shaqaalahayagu kuu soo wacaan si ay kuugu sheegaan ku daryeelida fiidiyowga oo aad kula hadashid dhakhtarka, haddii ay haboontahay ama loo baahdo. Tani waxay noo ogolaanaysaa in aad daryeel ka heshid adiga oo gurigaaga jooga. Haddii aad ogolaatid in aad ka qayb gashid ku daryeelida fiidiyowga shaqaalahayga hore ayaa kaa caawini doona sida aad ula xiriiri lahayd.
- Haddii aad keentid ilmo bukaan-socodka waxaan kugula talinaynaa in uu soo kaxeeyo hal waalid ama hal mas'uulka sharciyaysan ah. Haddii ay suurto gal tahay, hasoo kaxayn walaalaha la dhashay bukaanka. Qof kasta oo gala bukaan-socodka waa in uu caafimaad qabaa, oo uusan lahayn qandho, hawo-mareenada ka jiranayn. Waxa intaa dheer, in balanka kahor lagu soo wici doono si laguugu sheego in ay amaan tahay in aad imaan kartid bukaan-socodka iyo inkale.
- Fariimaha booqashada isla maalintaa ah iyo daryeelka deg-dega waa la cusboonaysiiyay, si loo siyaadiyo amaanka. Sidaas awgeed, fadlan nala soo xiriir oo nala socodsii wax kasta oo aad tabanaysid iyo wixii aad u baahantahay in lagaa caawino. Fadlan na soo wac wax ala

wixii astaama ah ama walwal ah si aan kaaga caawino sidii ku haboon oo wax loo samayn lahaa.

- Farmashiyaha Isbitaalka caruurta wuu furanyahay, waxuuna bixinayaa daawooyinka la qoro. Daawooyinka marar badan ayaa laga qaadan karaa taasoo ay keentay wakhtiga lagu jiro.
- Adeegayaasha bulshadu waa u diyaar sidii ay gacan idiin siin lahaayeen.

Waxaan rabnaa in aan idinku adkayno muhiimada ay leedahay in aad daryeeshid maskaxdaada.

Faafida jiradaan COVID-19 waxaa la fahamsanyahay in ay dadka ku keeni karto walwal badan. Waa culays badan oo keeni kara niyad jab oo dadku siyaabo kala duwan uga falceliyaan.

Culayska uu leeyahay faafida cudurka oo keena caabuqa waxaa ka mid ah: ·

- Baqdin iyo walwal caafimaadkaaga ah iyo caafimaadka kuwa aad jeceshahay.
- Isbadal ku dhaca hurdada iyo wax cunka.
- Hurdo la'aan iyo baraarugsanaan.
- Waxyeelada guud ee caafimaad ama ka darida jiro hore oo jirtay
- Cabidda khamriga oo badata, tubaakada iyo daroogada.

Waxyaalaha aad samayn kartid oo ku caawini kara:

- **Ka qaado biririf fiirsashada, akhriska ama wararka oo ay ka midyihiin la xiriirka bulshada. La socoshada warka cudurkaan faafiya wuxuu kuu siyaadin karaa culays aan caafimaad ku jirin.**
- Jirkaaga daryeel. U neefso si dheer, jimicso, isna ilowsii. Wax nafaqa leh cun, raashin dheeli tiran, mar walba jimicso, seexo hurdo badan, ka fogow khamriga iyo daroogada.
- Samayso wakhti aad nasatid. Isku day in aad samaysid waxyaalaha aad jeceshahay adigoo amaanka ilaalinaya.
- La xiriir dadka kale. La hadal dadka aad ku kalsoontahay oo aad ku aamini kartid arimahaaga.
- Wac dhakhtarkaaga, haddii walwalkaagu carqaladeeyo shaqo maalmeedkaaga dhowr maalmood oo isku xiga.

La xiriirka meelaha soo socda waxaad ka helaysaa macluumaad kaa yaraynayn kara culayska adiga iyo dadka kaleba:

- [Runta oo lala wadaago](#) arimaha COVID-19 iyo fahamka khatarta kaaga imaan karta adiga dadka ku khuseeya oo culaysku ka yaraanayo.
- Baro sidii aad [u daryeeli lahayd dareenkaaga kacsan](#).
- Macluumaad tafatiran ka raadso [CDC sidii aad u maaraynlahayd culayska iyo walbahaarka](#).

Ilo dheeraad ah oo ku saabsan COVID-19 waxaad ka heli kartaa:

- [Children's Minnesota](#)
- [National Hemophilia Foundation \(NHF\)](#)
- [Hemophilia Federation of America \(HFA\)](#)
- [Minnesota Department of Health \(MDH\)](#)
- [Centers for Disease Control and Prevention \(CDC\)](#)
- [World Health Organization \(WHO\)](#)
- [Children's Oncology Group](#)

Waxaan kuu rajaynayaa caafimaad iyo nabad-qab.

Kooxdaada bukaan-socodka kansarka iyo kansarka dhiiga ee Isbitaalka Caruurta MN.